



Washington State Liquor Control Board

Xashiis

Waxa ay khasabtahay in ay Waalidiintu Ogaadaan

In baddan oo dhalinyarada kamid ahi waxay doorteen in aysan isticmaalin xashiis.

Sikastaba, qaar way iskudayi doonaan, qaar kalena waxay sii wadi doonaan in ay isticmaalaan.

Kobcida Maskaxdu way sii soconaysaa illaa da'ada 25. Istimaaalka wax kasta oo darooga ah, ay kujirto xashiis, waxay daciifineysaa kobcida maskaxdu.

Istimaaalka Xashiisku wuxuu sii kordhinayaa khatarta dhibaatooyinka waxbarasho. Saameynta uu Xashiisku saameeyo waxbarashada, maskaxda, iyo rabitaanka waxay horseedi kartaa dhibaatooyin dugsiga ah.

Hadal Xilli hore. Hadal Inta badan.

- Adigu waxaad tahay qofka koowaad ee saameyn kuyeesha nolosha cunugaada.
- Kahadal in baddan iyo xilli hore waxyaabaha kusaabsan sameynta doorashooyinka saxda ah.
- Diyaari waxyaabaha lafilan karo.
- Kahadal natijada sharciyada iyo fullintooda.

Wixii macluumaad dheeri ah oo kusaabsan xashiiska:

[www.Learn About MarijuanaWA.org](http://www.LearnAboutMarijuanaWA.org)

ama www.drugfree.org

Si aad ula soo xariirto Guddiga Xakamaynta Khamrada Degmada

Washington kala xiriir iimaylka:

prevention@liq.wa.gov



Haddii qof aad garanayso uu ladhiboonyo isticmaalka daroogada, wac:

Washington Khadka caawimaada Reysashada
lambarkaan 1.866.789.1511

Si aad ugu hesho daabacadaan qaab bedel ah, laxiriir wakaalada Isku duwaha ADA lambarkaan (360) 664-1783.



DSHS 22-1558 SM (2/14)



Washington State
Liquor Control Board

Xashiis

Ogoow Xaqiiqaha

Xashiisku ma ahan mid dhib la'aan ah.

Xashiisku wuxuu daciifiyaa isku hagaagsanaanta iyo fahanka, wuxuu saameeyaa waxbarashada iyo maskaxda, wuxuuna sii kordhinayaa welwel, argagax iyo cabsi. Baaristu waxay tuseysaa in sideediiba hal oo dhalinyarada kamid ahi midkaas oo xashiis ku isticmaala da'ada 14 in uu noqonayo mid waalidkiisa kutiirsan oo aanan isku filnayn.

Qaar kamid ah khatarta ka imaan karta cabida xashiiska kasoo horjeedka isticmaalida xashiiska-gudbinta cuntada waa mid kaduwan. Dhuruqida nooc kasta oo qiiq ah wuxuu dhib u keenayaa sambabadaada. Istimaalida xashiiska-gudbinta cuntada sidoo kale waxay noqon kartaa mid khatar ah sababtoo ah waxay qaadanaasaa muddo dheer si loo dareemo saameynta. Way fududahay in lahaysto in baddan sababtoo ah saameyntu waa mid dib u dhacdey.

In si madadaalo ah loo isticmaalo xashiisku waa mid ay kuxirantahay xadidaad da'a ah. Keliya kuwa da'adoodu tahay 21 iyo kaweyn ayaa u adkaysan kara xashiiska, ay lajirto xad 1 wiiqiyad ama qiyaas aad u yar oo isticmaalka xashiiska ah, 16 wiiqiyado oo qaab adayg ah, iyo 72 wiiqiyado oo qaab dareere ah.

Meesha aad ku isticmaali kartid xashiiska waa meel xadidan. Xashiisku looma isticmaali karo meel ay dadku ka arki karaan. Sidoo kale looma ogola dowlada dhexe iyo in baddan oo dhulalka qabiilka kamid ah.

Cigaabaha loogu talo galay isticmaalka xashiiska ay isticmaalaan dadka kayar 21 waxay noqon kartaa mid aad u daran. Haddii aad kayartahay 21, waxaa laguugu eedayn karaa in aad tahay Booska Qof da'a yar. Haddii aad hayso wax kabadan 40 garaam, waa dembi Heerka "C" ah (\$10,000 ganaax iyo/ama 10 sanno oo xabsi ah).

Ma wanaagsana waalidiintu in ay lawadaagaan xashiisku caruurtooda. Waa dembi weyn in lasiiyo xashiiska qof da'a yar.